



Kaalay Ka Qeybqaado Dabaaldeegga Xaflada Dib-u-Furista Dugsiga Sarre ee Leodis McDaniel – Sabtida, Sebtamber 18th saacadu marka ay tahay 11 a.m.

Ardayda, Qoysaska iyo Bulshada Qaaliga ah ee McDaniel,

Waxaan jecelnahay inaan idin xasuusino Dabaaldeegga Dib U Furista Gaarka ah ee dib u cusbooneysiinta Dugsiga Sarre ee McDaniel maalinta Sabtida ah la qabanayo, Sebtamber 18keeda, saacadu marka ay tahay 11:00 subaxnimo. Iyada oo lagu qabanay barxada hore ee iskuulka 2735 NE 82nd Ave. Munaasabada xaflada waxaa la socon doona iyada oo ka soo qeybgalayaasha la tusi doono dhismaha cusub qeybihiisa kala gedisan ee uu ka kooban yahay.

[Halkani guji si aad u aragtid xaashida xayeysiinka Furitaanka Dugsiga McDaniel](#) | [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [中文](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#)

Iyada oo jirtay xeer caafimaad cusub kaasi waajinaya dhammaan gobolka munsaabadaha lagu qabanayo waxaa looga baahan yahay ka soo qeybgalayaashu inay xirtaan maaskarada afka lagu daboolo. Waa in marka aad bannaanka aad kaga soo qeybgaleysaan xafladan xirataan maaskarada iyo haddiiba aad rabtaan inaad soo daawataan gudaha dhismaha cusuba. Wuxaan rajeyneynaa inaan halkaasi kugu aragno!

Dhismahani oo la jaanqaadaya jawiga waxbarasho ee qarniga 21naad kaasi oo siin doonaa addeeg waxbarasho ardayda fara badan oo jinsi ahaan kala gedisan kuna nool magaalada Portland, ardaydaasi oo ku hadla in ka badan 30 luqadood, dhismahani cusub, barnaamijyada iyo fursadaha guusha. Dhismaha la cusbooneysiyyey oo ka kooban 296,000 fuudh oo laba jibaaran iyada oo in ka badan 170,000 fuudh laba jibaarani ay tahay dhisme cusub, waxaana ku jira tiyaatar, labo meel oo jimicsiga ah, iyo dhismaha ay ardaydu ku kulmaan oo ku yaala badhtamaha iskuulka cusub. Dhismayaashani cusub waxay ka kooban yihiin kuwo si wacan loo cusbooneysiyyey dhisme casri ahaa badhtamihii qarniga. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dib u cusbooneysiinta McDaniel waxaad booqataa shabakada

<https://www.pps.net/Page/1840>

Codbixiyaashu Waa Mahadsan Yihiiin

Xafiiska Dib Casriyeenta Iskuulada iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u mahadcelinayaan codbixiyaashii u codeeyey maalgalintii Iskuulada sanadihii 2012, 2017 iyo 2020. Maalgalinta waxay u saamaxday Dugsiyada Dadweynaha Portland inay sii wadaan shaqada lama horaanka ah ee kor loogu qaadayo caafimaadka, nabadjelyada iyo sidii ay u shaqeeyn lahaayeen dhismayaasha iskuuladeena gaboobera. Wixii macluumaad ah eek u saabsan mashruucyada maalgalinta PPS, fadlan waxaad booqataa [Shabakada Maalgalinta PPS](#). Wixii su'aalo ah, fadlan waxaad la xiriirtaa Xafiiska Dib U Casriyeenta Iskuulada ee schoolmodernization@pps.net.